



Dadka reer Alberta 12 iyo wixii kaweyn waxay hadda ka heli karaan caddeynta kaarka cabiran tallaalka iyada oo loo marayo goobta cusub ee Diiwaanka Koofid, oo aan loo baahnayn in la sameeysto koonto.

Kaydso ama daabac kaarka adiga oo bixinaya:

- + Bisha iyo sanadka tallaalka (kuuro kasta)
- + Lambarka Caafimaadka gaarka ah ee Alberta
- + Taariikhda dhalashada

Dadka reer Alberta waxay weli awoodaan inay isticmaalaan diwaanadooda tallaalka ee hadda jira, oo ay ku jiraan kuwa helay ballamaha tallaalka ama laga kaydiyey Diiwaanka Caafimaadkeyga (MyHealth Record), inay yihiin caddaynta tallaalka.

Dadka reer Alberta aan lahayn internet ama kuwa aan haysan dukumintigoodii asalka ahaa ayaa sidoo kale la xiriiri kara farmashiyaha ama xafiiska dhakhtarka halkaas oo ay ka qaateen tallaalka ama wac 811 si ay u codsadaan nuqul in boostada loogu diro.

Dadka reer Alberta waxay kaloo awoodi doonaan inay ka codsadaan xafiiska wakiilka diwaangelinta caddayntooda tallaalka maalmaha soo socda.

Hel caddayntaada dijitalka ah ee tallaalka:

<https://www.albertavaccinerecord.ca>

